



Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta		Lambarka: L3003
Buugga Hagaha: Maamulka	Qaybta: Maaliyadda	Taariikhda Dhaqangalka: 09/28/2026

I. UJEEDDADA:

- A.** Iyadoo looga dan leeyahay Siyaasadda Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale iyo Qiime-dhimista Kharashyada Bukaanka, Hay'adda Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange (Children's Hospital of Orange County, CHOC) waxa loola jeedaa shabakadda daryeelka ururada daryeelka caafimaad, adeegyada, iyo adeeg bixiyayaasha la xiriira CHOC. Shirkadda CHOC waxa ku jira shirkadahan soo socda:
1. Isbitaalka CHOC – isbitaalka carruurta ee wayn ee ku yaalla Orange, California, taas oo adeegyo caafimaad oo khaas ah siiya carruurta.
 2. CHOC ee Isbitaalka Mission - Xarrun caafimaad oo ku taalla Isbitaalka Providence Mission ee ku yaalla Mission Viejo, California, oo bixinaya daryeel caafimaad carruureed iyo adeegyo takhasuseed.
 3. Takhasuslaha CHOC - Koox dhakhaatiir ku takhasusay caafimaadka carruurta oo bixiya daryeel takhasuseedka qaybaha kala duwan ee takhasus hoosaaska caafimaadka carruurta ee shebekadda CHOC.
 4. Shebekadda Daryeelka Aasaasiga ah ee CHOC - shebekad daryeel bixiyayaal aasaasi ah oo la shuraako ah CHOC, oo adeegyo daryeel caafimaad oo buuxa siiya carruurta laga soo bilaabo dhalashada illaa dhalinyaronimada.
- Iyadoo wadajira, ayay hay'adahani u noqonayaan Shirkadaha CHOC (hadda ka dib loogu yeedhi doono CHOC), kuwaas daryeel caafimaad carruureed tayo sarreeya ku bixiya takhasusaadyo iyo goobo kala duwan, iyadoo loo eegayo shuruudaha iyo xaaladaha lagu cayimay Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale.
- B.** CHOC waxaa ka go'an inay dhammaan bukaannada siiso daryeel caafimaad oo tayo leh, iyada oo aan loo eegin xaaladdooda dhaqaale. Bukaannada buuxiya shuruudaha loo dejiyay Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale (Financial Assistance Program) ayaa u qalmi kara inay helaan Kaalmada Dhaqaale si ay ugu daboolaan dhammaan ama qayb ka mid ah kharashaadka daryeelka caafimaadka bukaanka. Si aad u codsato Kaalmada Dhaqaale fadlan tag websaydkeena barta (www.CHOC.org/patients-family/pay-bill). CHOC waxay sidoo kale bulshada inteeda kale ka taageertaa dhinacyada wacyigelinta caafimaadka iyo cilmi-baarista caafimaadka.
- C.** Siyaasaddan marka la fiirinayo, Kaalmada Dhaqaale waxa laga yaabaa in la siiyo bukaannada bilaa caymiska ah ama aan haysan caymis ku filan ee

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

aan iskood iskaga bixin karayn kharashaadka daryeelka caafimaadkooda. U-qalmitaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale waa in aan lagu saleyn da'da, jinsiga, fikirka galmada, qowmiyadda, asal ahaan halka qofku ka soo jeedo, naafonimo ama diinta.

- D.** Xaaladaha qaarkood, Kaalmada Dhaqaale waxa la siin karaa bukaanada xaaladooda dhaqaale aanay u saamaxayn ama aanay suurtoagal ahayn inay iska bixiyaan kharashaadka adeegyada caafimaadka lagama maarmaanka ah. Qiimeynta daruurinimada daawaynta caafimaadka ee CHOC waxay lag saleyn doonaa go'aan caafimaad. Go'aanka caafimaad ee dhakhtarka bukaanka ama dhakhtarka ka shaqeeya Waaxda Gurmada Degdegga ah ayaa noqon doona halbeegga keliya ee lagu go'aaminayo in bukaanku adeegyo ka helo CHOC. CHOC ma samayn doonto wax tallaabo ah oo dadka ka niyad-jebinaysa inay raadsadaan daryeel caafimaad oo degdeg ah.

II. CIDDAA AY KHUSAYSO:

Xeerkan wuxuu khuseeyaa dhammaan bukaannada CHOC, kuwa isbitaalka la seexiyo iyo kuwa aan la seexinba, oo ay ku jiraan bukaannada CHOC Medical Foundation, waxa kale oo uu khuseeyaa dhammaan daryeelka xaaladaha degdegga ah iyo daryeel kasta oo kale oo caafimaad ahaan loo baahan yahay. CHOC waxay u-qalmitaanka Kaalmada Dhaqaale ku go'aamisaa iyadoo ku salaynaysa codsiyada dhaqaale ee hadda la soo gudbiyey. CHOC ilo dibadeed kama raadiyaan u qalmitaanka ama go'aaminta Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale (FAP).

III. QEEXITAANADA:

- A. Qaddarka Caadi Ahaan Bukaanka Laga Qaado (AGB):** Hab ay CHOC dib ugu eegto lacagihii hore ee bukaannada laga qaaday si ay u go'aamiso xadka lacagta laga qaadi karo dadka ka faa'iidaysta Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale
- B. Daryeelka Samafalka:** Daryeel caafimaad oo bilaash ah
- C. Barnaamijka Macaashka Wadaagga Kharashka (CSBP):** Waa barnaamij xubinnimo ku salaysan oo xubintu si joogto ah u bixiso lacagta xubinnimada, badanaa bil kasta, lacagahaasna bil kasta loo qaybiyo xubnaha u baahan in laga caawiyo kharashaadka caafimaadkooda. Caadi ahaan, barnaamijyada macaashku ma oggola in biilka si toos ah loogu soo diro, balse waxay xubnahooda kula heshiiyaan inay u soo celiyaan lacagihii ay ku bixiyeen kharashaadkooda caafimaad.
- D. Lacag-bixinta La Dhimay ama Lacag-bixinta Qiimo-dhimista Leh:** Waa lacagta laga bixiyo daryeel caafimaad oo kharashkiisa la dhimay, balse aan gebi ahaanba bilaash ahayn.
- E. Xogta Bukaanka:** Waa lambarka diiwaanka caafimaadka, magaca bukaanka, taariikhda dhalashada, xaaladda caymiska iyo u-qalmitaanka taageerooyinka kale.

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

F. Qoyska Bukaanka: Ujeeddada xeerkan awgeed, qoyska bukaanka waxaa loola jeedaa dadka soo socda:

1. Qofka jira 18 sano ama ka weyn: xaaska ama sayga, ama lammaanaha ay nolosha wadaagaan sida lagu qeexay Qaybta 297 ee Xeerka Qoyska California, iyo carruurta ku tiirsan ee ka yar 21 sano, ama da' kasta haddii ay naafo yihiin, haddii ay guriga la nool yihiin iyo haddii kaleba;
2. Qofka ka yar 18 sano, ama ilmo ku tiirsan oo da'diisu u dhexayso 18 ilaa 20 sano, waalidka, qaraabada daryeelkiisa masuulka ka ah, iyo carruurta kale ee ku tiirsan waalidka ama qaraabada daryeelka masuulka ka ah ee ka yar 21 sano, ama da' kasta haddii ay naafo yihiin, iyadoo la raacayo Qaybta 1614(a) ee Qaybta A ee Cinwaanka XVI ee Xeerka Social Security.

IV. SIYAASADDA:

- A.** Waa siyaasadda CHOC in la go'aamiyo u qalmitaanka kaalmada Dhaqaale xilliga isdiwaangelinta, iyadoo loo marayo nidaamka qiimeynta dhaqaalaha ee dhammaan bukaanada aan buuxin shuruudaha carbuun dhigista ee CHOC.
- B.** Siyaasaddani waxay bukaanka dayn-bixinta ku liita ka soocaysaa bukaanka u qalma ee Kaalmada Dhaqaalaha inay fiiriyaan haddii qoyska bukaanku aanu rabin inuu lacagta bixiyo iyo inay caddahay in aanay iska bixin karayn. In bukaanku iyo/ama qoyska bukaanku ku fashilmaan u hogaansanka codsiga macluumaadka lagu caddeynayo awood la'aanta bixinta kharashka adeega waxaa lagu waayi karaa xuquuqda laguugu tixgelinayo Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale.
- C.** Hadafka CHOC waa in la aqoonsado bukaanka xaq u leh Kaalmada Dhaqaale xilliga diiwaangelinta; hase ahaatee haddii macluumaadka dhammeystiran ee caymiska bukaanka ku saabsan aan la heli karayn sababtoo ah daawayn degdeg ah ayaa loo baahan yahay, ama haddii xaaladda dhaqaale ee bukaanka/masuulka bukaanka ama qoyska bukaanka ay isbeddesho, u qalmitaanka Kaalmada Dhaqaale ee bukaanka waxa la go'aamin karaa ka dib marka adeegyada la bixiyo, oo mararka qaar xitaa waxa go'aanka la gaari karaa ka dib marka biilka bukaanka la soo saaro.
- D.** Haddii dhakhtar ama xirfadle caafimaad oo ka tirsan shaqaalaha uu doonayo in Kaalmo Dhaqaale horay loogu codsado bukaan la yaqaan, habraaca codsiga Kaalmada Dhaqaale waxaa laga heli karaa Paws, qaybta kaydka foomamka onlaynka ah.
- E.** Waxaa la ilaalin doonaa sirta xogta iyo sharafta bukaanka dhammaan dadka codsada ama hela adeegyada Kaalmada Dhaqaale.
- F.** Bukaannada adeegyada ka hela Qaybta Gurmada Degdegga ah ee isbitaalka waxay sidoo kale u qalmi karaan Kaalmada Dhaqaale si looga caawiyo bixinta kharashka dhakhtarka Qaybta Gurmada Degdegga ah.

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

Shirkadda qaabilsan biilasha dhakhaatiirta Qaybta Gurmada Degdegga ah waxay ku salayn doontaa u-qalmiinta FAP go'aanka uu isbitaalku gaaray, sida uu dhigayo Qaybta 127405(a)(1)(B) ee Xeerka Caafimaadka iyo Badbaadada.

- G.** Hoos waxaa ku qoran liiska bixiyayaasha adeegyada caafimaadka, marka laga reebo isbitaalka laftiisa, kuwaas oo isbitaalka gudihiisa ku bixiya daryeel caafimaad oo lagama maarmaan ah. Si helistooda loo fududeeyo waxa loo taxay iyadoo qaybahooda daryeelka loo eegay. Liiskani wuxu muujinayaa in bixiyayaasha uu daboolayo FAP-ka Isbitaalka.

Waaxda/Takhasuska Caafimaad	Uu Daboolo FAP-ka Isbitaalka	Aanu Daboolin FAP-ka Isbitaalka
Xasaasiyadda iyo Difaaca Jirka	x	
Suuxdinta ama Kabaabinta		x
Cudurada Wadnaha iyo Xidida Dhiiga	x	
Caafimaadka Ilkaha		x
Baaritaanada Raajada	x	
Qaybta Xaaladaha Degdegga ah		x
Caloosha iyo Uur-ku-jirta	x	
Daaweynta Guud/Qoyska	x	
Qalliinka Guud		x
Caafimaadka Xubnaha Uur-ku-jirta	x	
Qalliinka Neerfayaasha		x
Neerfayaasha	x	
Caafimaadka Dhalmada & Taranka Haweenka	x	
Caafimaadka Shaqada iyo Shaqaalaha	x	
Daawaynta Kansarka	x	
Caafimaadka Indhaha	x	
Dhakhaatiirta Qalliinka oo Dhan		x
Caafimaadka Dhegaha, Cunaha iyo Sanka	x	
Baarista Dulinada Cudurada Keena		x
Caafimaadka Carruurta	x	

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

Daawaynta Jimicsiga/Dibudejinta	x	
Qalliinka Quruxeed	x	
Caafimaadka Cagaha		x
Cudurada Sambabada	x	
Raajooyinka Daawaynta	x	
Qalliinka Laabta		x
Caafimaadka Kaadi-mareenka	x	
Qaybaha Kale: Caafimaadka Dhimirka	x	
Qaybaha Kale: Hiddo-sideyaasha Caafimaadka	x	
Qaybaha Kale: Cudurrada Maqaarka	x	
Qaybaha Kale: Cudurrada Hormoonnada	x	
Qaybaha Kale: Cudurrada Dhiigga	x	
Qaybaha Kale: Dhakhaatiirta Bukaannada Isbitaalka Jiifa	x	
Qaybaha Kale: Cudurrada Faafa	x	
Qaybaha Kale: Caafimaadka Dhallaanka	x	
Qaybaha Kale: Cudurrada Kelyaha	x	
Qaybaha Kale: Cudurrada Kala-goysyada iyo Laabatooyinka	x	
Daawada Hurdada ee Kale	x	

V. HABRAACA:

A. U Qalmitaanka

1. Aqoonsiga Kaalmada Dhaqaale waxa lagu gaaraa in la go'aamiyo xaaladda dhaqaale ee bukaanka ama qoyska bukaanka. Go'aamintan waa in la sameeyo xilligan diiwaangelinta ama ka hor diiwaangelinta, ama islamarkiiba ka dib hadba sida ugu dhakhsaha

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

badan. Xaaladaha qaarkood, sida marka qofka la dhigo qaybta xaaladaha degdega ah, waxa laga yaabaa inay suurto gal noqon waydo in la go'aamiyo u qalmitaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale illaa ka dib marka bukaanku baxo. Xaaladaha oo kale, ama xaaladaha dhacdooyin dhacaan inta bukaanku xarunta caafimaad joogo ama ka dibba kuwaas oo beddela xaaladda dhaqaale ee bukaanka ama qoyska bukaanka, u qalmitaanka bukaanka ee Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale waa in aanu waqtigu sinnaba u saameyn go'aaminta in bukaanku buuxinayo shuruudaha u qalmitaanka.

2. Masuuliyadda aqoonsashada u qalmitaanka bukaanka ee Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale xilliga bukaanku soo booqdo CHOC, ama ka horba, waa masuuliyadda waaxda diiwaangelinaysa bukaanka. Tani waxay u baahan doontaa in bukaanka ama qoyskiisu ay buuxiyaan foomka "Shaacinta Xogta Dhaqaale." Waxaa sidoo kale laga yaabaa in loo baahdo nuqullo ka mid ah dukumentiyada khuseeya, sida warqadaha mushaharka ee dhowaan la bixiyey, waraaqaha canshuur-celinta dakhliga ama dukumentiyada kale, si loo ogaado dakhliga sannadlaha ah ee bukaanka ama qoyskiisa. Xaaladaha kor lagu soo sheegay ee aan u-qalmitaanka la xaqiijin karin waqtiga adeegga la bixinayo, Xarunta Kheyraadka Dhaqaale ee Qoyska ee CHOC ayaa la shaqayn doonta bukaanka ama qoyskiisa si loo go'aamiyo u-qalmitaanka.
3. Bukaanka ama qoyska bukaanka ee caymiska haysta waxay sidoo kale u qalmi karaan Kaalmada Dhaqaale si ay isaga bixiyaan qaybta biilka ee aanu caymisku daboolayn. Qaybtan waxa ku jiri kara lacagaha caymiska ka hor la sii baxsho, caymis-wadaaga iyo adeegyada aanu caymisku daboolin. U-qalmitaanka bukaanka waxaa lagu go'aamin doonaa isla shuruudaha lagu qiimeeyo bukaanka aan caymiska lahayn.
4. Bukaan kasta oo kharashkiisa caafimaad uu badan yahay, ha ahaado mid caymis leh ama aan caymis lahayn, wuxuu u qalmi karaa Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale. Waxaa ka mid ah bukaannada 12-kii bilood ee la soo dhaafay jeebkooda ka bixiyey kharashaad caafimaad oo ka badan 10% dakhliga qoyskooda, iyadoo la isku darayo kharashaadka caafimaad ee kaga baxay isbitaalkan iyo xarumaha kale ee caafimaadka. Kharashaadka jeebka laga bixiyo waxaa loola jeedaa kharash kasta oo daryeel caafimaad oo uusan caymisku ama barnaamijka daryeelka caafimaadku daboolin. Kharashaadka uu bixiyo qofka mas'uulka ka ah bixinta kharashka bukaanka, ee aan la xiriirin bukaanka, laguma dari doono qiimaynta. Rasiidh(ada) ama biil(asha) caddaynaya kharashaadka la bixiyey waa in lagu lifaaqaa Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee qofka mas'uulka ka ah bixinta kharashka bukaanka. Qoraal la saxiixay oo

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

lagu xaqiijinayo arrintan looma aqbali doono caddayn muujinaysa in bukaanku galay Kharash Caafimaad oo Badan.

5. Habka Codsiga

- a. Si loo codsado Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale loona go'aamiyo in bukaanku u qalmo, bukaanka ama qofka mas'uulka ka ah bixinta kharashkiisa waa inuu Codsiga Kaalmada Dhaqaale oo dhammaystiran u gudbiyaa Xarunta Kheyraadka Dhaqaale ee Qoyska ee CHOC.
- b. Codsiyada Kaalmada Dhaqaale waxaa laga heli karaa boggayaga internetka (www.CHOC.org/patients-family/pay-bill). Codsiga Kaalmada Dhaqaale iyo caawimaadda ku saabsan habka loo buuxiyo loona gudbiyo codsiga waxaa lagu heli karaa iyadoo lala xiriiro Xarunta Kheyraadka Dhaqaale ee Qoyska ee CHOC lambarka 714-509-8600. Codsiyada Kaalmada Dhaqaale waxaa lagu diri karaa iimayl ama boostada USPS, iyada oo aan wax kharash dheeraad ah laga qaadin. Codsiyada waxaa sidoo kale laga heli karaa Waaxda La-talinta Dhaqaalaha ee CHOC oo ku taalla 1201 W. La Veta Avenue. La Veta Avenue, Orange, California 92868
- c. Marka la qiimaynayo u-qalmitaanka Lacag-bixinta Qiimo-dhimista Leh, isbitaalku wuxuu bukaanka ama qofka mas'uulka ka ah bixinta kharashkiisa ka dalban karaa inuu maro qiimayn lagu ogaanayo inuu u qalmo Medi-Cal. Isbitaalku kama dalban doono bukaanka inuu codsado Medicare, Medi-Cal ama caymis kale ka hor inta aan la qiimayn u-qalmitaankiisa ama aan la siin Lacag-bixinta Qiimo-dhimista Leh. Isbitaalku wuxuu bukaanka ka dalban karaa inuu codsado Medicare, Medi-Cal ama caymis kale ka hor inta aan la qiimayn u-qalmitaankiisa ama aan la siin Daryeelka Samafalka
- d. Bukaanka ama qofka mas'uulka ka ah bixinta kharashkiisa waa inuu sameeyaa dadaal kasta oo macquul ah si uu u keeno dukumentiyada caddaynaya dakhliga bukaanka ama qoyskiisa, ka hor inta aan codsiga la tixgelin. Dakhliga waa in lagu xaqiijiyaa waraaqaha canshuur-celinta dakhliga ee sannadkii ugu dambeeyey iyo/ama warqadaha mushaharka ee dhowaan la bixiyey. Haddii kale, waxaa la soo gudbin karaa caddaymo muujinaya ilo kale oo dakhli
- e. Haddii waalidka ama qofka mas'uulka ka ah bixinta kharashka bukaanka uusan lahayn wax dakhli ah ama uusan awoodin inuu keeno dukumentiyada caddaynaya dakhliga, CHOC waxay go'aankeeda ku dalban kartaa bukaanka ama qofka mas'uulka ka ah bixinta kharashkiisa inuu soo gudbiyo qoraal

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

xaqiijin ah oo uu saxiixay, isagoo og in sharci ahaan lagu xisaabtami karo haddii uu been sheego, kaas oo lagu xaqiijinayo (i) in xogta dakhliga ee lagu sheegay Codsiga Kaalmada Dhaqaale ay run tahay, (ii) sababta aan loo soo gudbin dukumentiyada caddaynaya dakhliga, iyo (iii) haddii uusan jirin wax dakhli ah, sida qofku u daboolo baahidiisa iyo tan qoyskiisa.

6. Muddada U Qalmitaanka.
 - a. Bukaannada la go'aamiyay inay barnaamijka u qalmaan waxa Kaalmada Dhaqaale la siin doonaa muddo lix bilood ah.
7. **Xisaabinta Qaddarka Kaalmada Dhaqaale.**
 - a. CHOC waxay heli doonaan macluumaadka dakhliga qoyska bukaanka, oo ay ku jiraan mushaharaadka iyo mushqaayadaha, lacagaha kaalmada ah, lacagaha sooshal sekyuuratiga, dheefaha la siiyo shaqaalaha shaqo-joojinta sameeyay, dheefaha dadka bilaa shaqada ah, lacagaha taageerada ilmaha, lacagaha waalidku ilmaha ku taageero, faa'iido wadaaga iyo dulsaarada. Wadarta dakhliga qoyska waxa la barbar dhigi doonaa shaxda (eeg Jadwalka A) si loo go'aamiyo u qalmitaanka Kaalmada Dhaqaale ee bukaanka marka la fiiriyo Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka. Bukaannada bilaa caymiska ah ama bukaannada kharashkooda caafimaadku sarreeyo ee dakhligooda qoysku joogo 550% ee Tilmaamaha Saboolnimada ama ka hooseeya ayaa u qalma inay codsadaan Kaalmada Dhaqaale. Kaalmada Dhaqaale qayb ahaan baa loogu tixgelin doonaa bukaannada dakhligoodu ka sarreeyo 400% Tilmaamaha Saboolnimada kana hooseeyaan 550%.
 - b. Qoysaska dakhligooda sannadlaha ah joogo ama ka hooseeyo 400% Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka waxay 100% u qalmi doonaan Kaalmada Dhaqaale. Bukaannada aan caymiska lahayn ama kuwa caymiskoodu uusan ku filnayn, ee dakhliga qoyskoodu yahay 400% ama ka hooseeya heerka saboolnimada, sida lagu go'aamiyey Codsiga Kaalmada Dhaqaale, waxay heli doonaan daryeel caafimaad oo bilaash ah.
 - c. Marka la bixinayo Daryeelka Samafalka, sharcigu wuxuu CHOC ku waajibinayaa inay tixgeliso qaddarka caadi ahaan bukaanka laga qaado dadka leh caymis daboolaya daryeelka degdegga ah ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ("Qaddarka Caadi Ahaan Bukaanka Laga Qaado" ama "AGB"), isla markaana ay xaqiijiso in bukaannada loo oggolaaday Daryeelka Samafalka aan laga qaadin lacag ka badan AGB adeegyada degdegga ah iyo

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

- adeegyada kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah.
- d. Bukaannada Rugta Caafimaadka Bulshada ee CHOC waxay u qalmaan Kaalmada Dhaqaale sida ku cad xeerkan, Jadwalka B ayaa loo adeegsadaa in lagu xisaabiyo lacagta uu bukaanku ka bixinayo booqasho kasta iyadoo lagu salaynayo heerka dakhligiisa, bukaannada dakhligoodu ka hooseeyo 550% Heerka Saboolnimada Federaalka.
 - e. Bukaannada codsada Kaalmada Dhaqaale ee loo oggolaado kaalmada oo dhan ama qayb ka mid ah, oggolaanshaha kaalmadooda waxaa loo gudbin doonaa shirkadda qaabilsan biilasha dhakhaatiirta Qaybta Gurmada Degdegga ah. Shirkadda qaabilsan biilasha dhakhaatiirta Qaybta Gurmada Degdegga ah waxay ku salayn doontaa u-qalmitaanka FAP go'aanka uu isbitaalku gaaray, sida uu dhigayo Qaybta 127405(a)(1)(B) ee Xeerka Caafimaadka iyo Badbaadada.
8. **Xeerka Lacag-bixinta Qiimo-dhimista Leh**
- a. Bukaannada dakhliga qoyskoodu u dhexeeyo 401% ilaa 450% ee Heerka Saboolnimada Federaalka, isbitaalku wuxuu siin doonaa Jadwalka Kharashaadka Bukaanka Aan Caymiska Lahayn oo qiimo-dhimis leh, kaas oo kharashka caafimaad ee la oggol yahay laga dhimayo 75% lacagta biilka ku qoran. Marka la eego qaybtaan, bukaannada loo oggolaaday Lacag-bixinta Qiimo-dhimista Leh lagama qaadi doono lacag ka badan AGB adeegyada gurmada degdegga ah iyo adeegyada kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah.
 - b. Bukaannada aan caymiska lahayn ee dakhliga qoyskoodu u dhexeeyo 451% ilaa 550% ee Heerka Saboolnimada Federaalka, CHOC waxay siin doontaa Jadwalka Kharashaadka Bukaanka Aan Caymiska Lahayn oo qiimo-dhimis leh, kaas oo kharashka caafimaad ee la oggol yahay laga dhimayo 50% lacagta biilka ku qoran. Marka la eego qaybtaan, bukaannada loo oggolaaday Lacag-bixinta Qiimo-dhimista Leh lagama qaadi doono lacag ka badan AGB adeegyada gurmada degdegga ah iyo adeegyada kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah.
9. Tilmaamaha U Qalmitaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee CHOC waxay ku saleysan yihiin Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka ee dhowaan la daabacay. Jadwalka A wuxuu muujinayaa xaddiyada dakhliga qoyska ee waafaqsan Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka, kuwaas oo sannad kasta la soo saaro.
10. Haddii bukaanka ama qofka mas'uulka ka ah bixinta kharashkiisa loo oggolaado Kaalmada Dhaqaale, dhammaan biilasha weli lagu

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

leeyahay ee bukaanku isagu iska bixinayo marka go'aanka la gaaro, waxaa lagu dabaqi doonaa boqolleyda qiimo-dhimista ee uu xaq u yeeshay sida ku cad codsiigiisa.

11. CHOC waxay adeegsan doontaa habka soo socda si loo xisaabiyo Qaddarka Caadi Ahaan Bukaanka Laga Qaado (AGB). Sannad kasta, marka uu dhammaado sannad-maaliyadeedkii hore, waxaa dib loo eegi doonaa lacagihii Isbitaalku ka helay sheegashooyinka Medicare ee adeeg kasta si gaar ah loo bixiyo, dhammaan caymisyada caafimaadka gaarka loo leeyahay iyo Barnaamijka Macaashka Wadaagga Kharashka (CSBP).
12. Go'aanka kama dambaysta ah ee ah in bukaanku aanu u qalmin Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale lama gaari doono ilaa ay ka soo wareegto ugu yaraan 150 maalmood markii biilka ugu horreeya la diray.
13. **U-qalmitaanka Hore Loo Qiyaasay:** Marka laga reebo habka codsiga gacanta lagu buuxiyo, bukaannada waxaa sidoo kale loo aqoonsan karaa inay u qalmaan Kaalmada Dhaqaale iyadoo la adeegsanayo hababka soo socda.
 - a. Xaaladda hoy la'aanta ama qaxootinimada, marka aan la hayn xogta bukaanka.
 - b. Caddaynta laga helo qalab qiimayn oo ay bixiso cid saddexaad, iyadoo aan loo eegin xaaladda caymiska.
 - c. U-qalmitaankii Hore Loo Oggolaaday: Bukaannada loo aqoonsaday inay u qalmaan waxaa la siin karaa Kaalmada Dhaqaale muddo lix bilood ah.
14. **U Qalmitaanka Lacagbixinaha Billaha ah**
 - a. Bukaanku kasta ama qoyska bukaanka ee u qalma ee Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha loogu ogolaaday qiimo-dhimis kharasheed qayb ah ayaa sidoo kale u qalmi doona inay lacago bille ah bixiyaan. CHOC iyo qoyska bukaanka ayaa ka gorgortami doona shuruudaha qorshaha lacagbixinta. Haddii qoyska bukaanka iyo CHOC ay heshiis gaadhi kari waayaan, qoyska bukaanka waxa laga rabaa inay buuxiyaan foomka qorshaha lacagbixinta muddad fidsan ee CHOC FAP (Jadwalka C). Marka foomkan helaan, CHOC waxay qiimeyn doonaan wadarta dakhliga qoyska kadib marka laga jaro kharashaadka aasaasiga ah ee qoyska. Qorshe lacagbixineed bille ah ayaa qoyska loo bandhigi doonaa kaas oo aan ka badnaan karin 10% dakhliga qoyska marka laga jaro kharashaadka aasaasiga ah. Inta lagu jiro muddada lacagcelinta ee la ansixiyay, CHOC wax dulsaar ah kuma dallaci doonto haraaga koontada ee qiimo dhimista loo sameeyay.

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

- b. Qorshaha lacagbixinta muddada fidsan waxa lagu dhawaaqi doonaa inaanu shaqeynayn ka dib marka bukaanka ama qoyksa bukaanku ku fashilmaan inay si joogto ah lacagta u bixiyaan muddo 90 beri ah. Ka hor inta aan lagu dhawaaqin in qorshaha lacagbixinta muddada fidsan aanu shaqeynayn, CHOC, ama hay'adda lacagta u uruurinaysa, ama cidda ay u asteeyeen waa inay isku day macquula sameeyaan kaas oo ay ku ogeysiinayaan bukaanka ama qoyska bukaanka taleefan ahaan ama waraaq loogu dirayo cinwaankii ugu dambeeyay ee lagu ogaa, in qorshaha lacagbixinta muddada fidsan ku dhow yahay inuu fashilmo oo ay jirto fursad ay dib uga wada hadli karaan haddii uu codsado bukaanku ama qoyska bukaanku.

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

B. Waxyaabaha laga soo reebay:

1. In la fahmo inay jiraan xaalado adag oo yimi kuwaas oo u baahan tixgelin gaar ah si Kaalmada Dhaqaale loogu ansixiyo bukaanada aan buuxin shuruudaha la dejiyay. Wakillada CHOC waa inay ka warqabaan tan markay kiisaska bukaanada shaqsiga ah u qiimeynayaan Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale. In kastoo aanay suurtoagal ahayn in la bixiyo liiska dhammeyska tiran ama go'an ee xaaladaha dhibaataada uga sii daraya ee iman kara, qodobada muhiimka ah ee la tixgelin doono waxa ka mid ah:
 - a. Qaddarka daynta lagu leeyahay bukaanka ama qoyska bukaanka marka loo eego wadarta dakhligooda. Haddii wadarta kharashka bukaanku jeebkiisa ka bixinayo markuu joogo CHOC ka badato 10% dakhliga sannadlaha ah ee bukaanka ama qoyska bukaanka 12 kii bilood ee la soo dhaafay.
 - b. Xaaladda caafimaad ee bukaanka ama daryeel bixiyaha qoyskiisa.
 - c. Sida ay bukaanka ama qoyska bukaanka uga go'an tahay inay CHOC kala shaqeeyaan isticmaalka dhammaan ilaha lacagbixineed ee kale ee la heli karo.
2. Xaalad kasta oo loo tixgelinayo inay ka qayb noqon karta "xaaladaha dhibaataada uga sii daraya" waa in lagu soo wargeliyo Agaasimaha Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka. Kiisaska soo hoos gelaya qaybtan waxay u baahan karaan inuu soo ansixiyo Ku xigeenka Sarkaalka Fulinta Maaliyadeed ee Ugu Sarreeya.

C. Nidaamka Aqbalaadda/Diidmada/Racfaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale

1. Koontada bukaan kasta oo lagu taliyay inuu si buuxda ama qayb ahaan u helo Kaalmada Dhaqaale, ka dib markuu buuxiyo tilmaamaha siyaasaddan ku xusan waxa looga baahan yahay nidaamyada saxiixa ogolaanshaha ee soo socda:

a. CHOC (Isbitaalka iyo Rugaha Caafimaadka)

Ilaa \$2,000	Shaqaalaha Maamulka Dakhliga
Ilaa \$10,000	Kormeeraha Qaybta Maamulka Dakhliga
Ilaa \$50,000	Maareeyaha Qaybta Maamulka Dakhliga
Ilaa \$100,000	Agaasimaha Qaybta Maamulka Dakhliga
Ilaa \$250,000	Agaasimaha Sare/Fulinta
Ilaa \$1,000,000	Madaxweyne-ku-xigeenka Maamulka Dakhliga
Ka badan \$1,000,000	Madaxa Maaliyadda

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

b. CHOC Medical Foundation

Ilaa \$2,000	Shaqaalaha Qaybta Maamulka Dakhliga
Ilaa \$10,000	Kormeeraha Qaybta Maamulka Dakhliga
Ilaa \$50,000	Maareeyaha Qaybta Maamulka Dakhliga
Ilaa \$100,000	Agaasimaha Qaybta Maamulka Dakhliga
Ilaa \$250,000	Agaasimaha Sare/Fulinta
Ilaa \$1,000,000	Madaxweyne-ku-xigeenka Maamulka Dakhliga
Ka badan \$1,000,000	Madaxa Maaliyadda

2. Marka go'aan laga gaaro in koontada bukaanka loo oggolaado ama loo diido Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale, bukaanka waxaa loo diri doonaa warqad lagu ogeysiinayo go'aanka la gaaray. Haddii codsiga Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale la soo diido, wakiil CHOC ka socda ayaa la soo xiriiri doona bukaanka ama qoyska bukaanka si ay isula meel dhigaan sida lacagta loo bixinayo.
3. **Nidaamka Racfaanka:**
Haddi mar uun inta lagu jiro nidaamka ansixinta Kaalmada Dhaqaale codsiga khilaafku ku yimaaddo, bukaanka ama qoyska bukaanka ayaa xaq u leh inay codsadaan in codsigooda dib u eegis loogu sameeyo heerka xiga ee nidaamka ansixinta. Go'aanka kama dambeysta ah ee diidmada Kaalmada Dhaqaale waxa si gaar ah isaga Maamule Ku Xigeenka Fulinta iyo Ku xigeenka Sarkaalka Fulinta Maaliyadeed ee Ugu Sarreeya, oo go'aankooda waxa loo tixgelin doonaa inuu kama dambeys yahay.
4. Racfaanka bukaanka ama qoyska bukaanka waa in qoraal ahaan loogu soo gudbiyo Agaasimaha Xisaabaadka Bukaanaada muddo soddon (30) beri gudahood ah oo ka bilaabmayso taariikhda ogeysiinta diidmada koobaad.
5. Bixinta Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale meesha kama saareyso in qofka lagu soo dallaco kharashka dhammaan adeegyada isla marka adeega la bixiyo ama ka dibba, haddii la ogaado in xog khaldan, been abuur ah ama kala dhiman loo adeegsaday nidaamka codsiga. Intaa waxaa dheer, CHOC waxay xaq u leedahay inay qaaddo dhammaan tallaabooyinka sharci ee loo baahan yahay, oo ay ku jiraan magdhowga madaniga iyo ciqaabta dambiyada, kana qaaddo dadka bixiyey xog been ah, aan sax ahayn ama aan

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

dhammaystirnayn si ay ugu qalmaan Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale.

D. Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale: Ogeysiinta Bukaanka ama Qoyska Bukaanka

1. Warqadaha biilasha ee CHOC ee loo diro bukaanka waxaa ku jiri doona ogeysiis ku saabsan Xeerka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee CHOC iyo macluumaadka lagala xiriiri karo si loo helo faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan kaalmada. Ogeysiiskan waxaa la socon doona warqad ay ku qoran tahay farriinta soo socota, taas oo lagu bixin doono Af-Ingiriisi iyo 15-ka luqadood ee ugu badan ee ay ku hadlaan dadka ku nool California ee aan si fiican ugu hadlin Af-Ingiriisiga (LEP), sida ay go'aamisay Waaxda Adeegyada Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka. "FIIRO GAAR AH: Haddii aad u baahan tahay in lagugu caawiyo luqaddaada, fadlan wac [lambarka taleefanka ay bukaannadu ka heli karaan macluumaad dheeraad ah]. Xafiisku wuxuu furan yahay [saacadaha shaqada] wuxuuna ku yaal [goobta xafiiska]. Waxaa sidoo kale la heli karaa caawimaad iyo adeegyo loogu talagalay dadka la nool naafonimada, sida dukumentiyada ku qoran farta dadka aragga la' (Braille), farta waaweyn, cod ahaan, iyo qaabab kale oo elektaroonig ah oo si fudud loo adeegsan karo. Adeegyadan waa bilaash". Intaas waxa dheer, dhammaan bayaanada bukaanka waxa la socon doona sida qoyska bukaanku u heli karaan macluumaad ku saabsan California Health Benefit Exchange, iyo sidoo kale qorsheyaasha caafimaad ee gobolku ama degmadu maalgeliso. Isbitaalku wuxuu hayn doonaa codsiyada barnaamijyada gobolka iyo kuwa degmada si loogu qaybiyo bukaannada.
2. Soo koobidda Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale oo ay la socdaan xogta xiriirka oo ku qoran af Ingiriisi iyo af Isbaanish waa in lagu soo dhejiyo goobaha saxmadda badan ee CHOC, sida qaybta Qaabilaadda, Qolka Xaaladaha Degdega ah, Rugaha, Qaybta Diiwaangelinta Bukaana-socodka iyo Xafiisyada Xisaabaadka Bukaannada.
3. CHOC waxay dhammaan bukaanada lacagta iskood isaga bixinaya barta ay adeega ka helayaan ku siin doontaa Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale iyo xogtiisa xiriirka, iyo sidoo kale macluumaad ku saabsan barnaamijyada dawladu maalgeliso iyo xogta xiriirka ee barnaamijka California Health Benefit Exchange.

E. Nidaamka Lacag Uruurinta:

1. Haddii bukaanku kaalmo ugu qalmo si waafaqsan Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale oo uu dedaal badan ku bixinayo siduu daynta ugu bixin lahaa waqti macquul ah, CHOC ama wakiiladeedu waa in aanay u dirsan, ama ugu hanjabin inay u dirayso hay'ad kale oo lacagta ka soo uruurisa, haddii taasi saameyn taban u geysanayso

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

sumcadda daymeed ee bukaanka. Haddii ay CHOC ku qasbanaato inay koonto ku wareejiso wakaalad dayn uruuriineed iyaga ka baxsan, qaddarka loo gudbiyay wakaaladda dayn uruurinta waa inuu noqdo midka la dhimay ee bukaanka xaq u leeyahay marka la fiirsho Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale. CHOC ma geli doonto wax dedaalo dayn ururineed aan caadi ahayn. Haddii ay dhacdo in bukaanku lacag ka badan lacagtii lagu lahaa ku shubo koontadooda CHOC, CHOC waa inay bukaanka u celiso lacagta dheeraadka ah iyo dulsaarkii ku kordhay oo waafaqsan heerka shuruucda dejisay lagana soo bilaabay taariikhda isbitaalku bukaanka lacagta ka helay. CHOC, si kastaba ha ahaatee, kuma waajib ah inay celiyaan lacag ama dulsaar haddii lacagta dheeraadka ah ka yar tahay \$5.00. Isbitaalku wixii lacag dheeraad ah ee ka yar \$5.00 wuxu ka jari doonaa kharashka aad gasho muddo 60 maalmood ah ka dib marka aad bixiso.

2. CHOC waa in aanay, markay la tacaamulayaan bukaano aan caymis haysan oo dakhligoodu ka hooseeyo 400% Heerka Saboolnimada Federaalka, kharashka ka goosan dakhligooda ama amar maxkamadeed ahaan uga dalban lacag bixin ku tacaluqda biilasha adeegyada caafimaadka CHOC. Shuruuddani kama hor istaagayso CHOC inay cid saddexaad oo mas'uul ka ah kharashka ka dalbato lacagta ku waajibtay marka heshiis magdhow la gaaro.

F. Soo Celinta Lacagta Dheeraadka ah ee La Qaaday

1. CHOC waxay bukaanka u soo celin doontaa lacag kasta oo uu bixiyey oo ka badan lacagta looga baahnaa inuu bixiyo sida uu dhigayo FAP, oo ay ku jirto wixii dulsaar ah ee lagu leeyahay, muddo 30 maalmood gudahood ah laga bilaabo marka la oggolaado codsigiisa Kaalmada Dhaqaale.
2. Lacagaha soo socda waxaa loo tixgelin doonaa lacag ka badan intii bukaanka looga baahnaa inuu bixiyo sida uu dhigayo Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta.
 - a. Lacag kasta oo lagu bixiyo baaqiga weli lagu leeyahay bukaanka/qoyska inta u dhexeysa taariikhda la gudbiyo Codsiga Kaalmada Dhaqaale iyo taariikhda la oggolaado.
 - b. Lacag kasta oo la bixiyo kadib marka la oggolaado Codsiga Kaalmada Dhaqaale, taas oo ka badan lacagta bukaanka looga baahan yahay inuu bixiyo marka lagu saleeyo heerka qiimo-dhimista loo oggolaaday.

G. Dukumeentiyada Qiimo-Dhimisyada Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale

Xaaladaha la go'aamiyo in bukaanku u qalmo Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale, waxaa muhiim ah in faylka bukaanka si habboon loo diiwaangeliyo, si ay u fududaato in bukaanka la aqoonsado, isla markaana loo hayo diiwaan sax ah oo ku saabsan xaqiiqooyinkii horseeday go'aanka ah inuu u qalmo Kaalmada Dhaqaale. Dukumentiyada aasaasiga ah ee loo

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

baahan karo kiis kasta oo Kaalmada Dhaqaale ah waxay ku koobnaan karaan hal ka mid ah kuwa soo socda:

1. Nuqul Xaashida Muujinta Xoga Dhaqaale ee bukaanka ama qoyska bukaanka ah, oo ay la socdaan dukumeentiyada kale ee taageeraya (t.a canshuur celiskii sannadihii la soo dhaafay (dukumeentiyada la soo bandhigayo), Foomamka W-2, ama waraaqaha mushaharka ee hadda).
2. Nuqulada dukumeentiyada, qoraalada iwm. ee dheeraadka ah, ee sharraxaya xaaladaha dhibaata uga sii daraya ee la tixgeliyay markii la go'aaminayay u qalmitaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale (haddii la heli karo ama loo baahan yahay).
3. Nuqulka "Ansixinta Kaalmada Dhaqaale" oo ay saxeexeen wakiilada Isbitaalka ee ku habboon (haddii la heli karo).
4. Kicitaanka ganacsi ee sannadkii u dambeeyay (toos ugu qalmitaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale).

H. Warbixinaha

Kaalmada Dhaqaale waa in lala diiwaangeliyo macluumaadkan soo socda:

1. Xogta bukaanka oo ay ku jirto Macluumaadka Caafimaad ee Ilaashan (PHI) waxa loo ilaalin doonaa qaab xafidaysa qarsoodinimo macluumaadkaas waxana loo diiwaangelin doonaa keliya haddii ay lagama maarmaan u tahay Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale.
 - a. Xaaladda bukaan-socod ama bukaan-jiif
 - b. Kharashka bukaanka ee guud
 - c. Kharashaadka Kaalmada Dhaqaale, la ansixiyay ama la diiday
 - d. Taariikhda ansixinta/diidmada
 - e. Sababta loo diiday
2. Dhammaan faylasha codsiga waa kuwo sir ah waxana lagu kaydin goob xafidan muddo ugu yaraan saddex sannadood ah ka dib taariikhda codsiga iyo dhammaadka hanti dhowrka sannad xisaabeedka CHOC. Dhammaan xogta Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale waxa la hayn doonaa muddo toddobo (7) sannadood ah. Dhammaadka muddada la cayimay, dhammaan macluumaadka waa la burburin doonaa ama waxa loo hayn doonaa qaab ilaalinaysa sirnimada iyo qarsoodinimada bukaanka.
3. Siyaasaddan waxa lagama beddeli karo si loo saaro ama loo yareeyo dheefaha dheef-qaatayaasha. Isbeddel kasta oo lagu sameynayo siyaasaddan waa inay marka hore soo ansixisaa Waaxda Hogaansamida.

VI. TIXRAACYO:

- A. Maamulka Wareegga Dakhliga, Zimmerman and Associates. Diiseembar 2002.

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Buugga Hagaha: Maamulka	Lambarka: L3003
Qaybta: Maaliyadda	Cinwaanka: Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Bukaanka iyo Qiimo-dhimista Lacag-bixinta

- B.** Ururka Isbitaalada California, Mabaadi'da iyo Tilmaamaha Tabaruca ee lagu caawinayo Bukaanaada Bilaa Caymiska ah ee Dakhligoodu Hooseeyo Febraayo, 06, 2004.
- C.** Ururka Isbitaalada Maraykanka, Bayaanka Mabaadi'da iyo Tilmaamaha Biil Dallicsita iyo Dayn Soo Uruurinta, Abril 27, 2004.
- D.** Hindise Sharciyeedka Golaha 774 ee Chan-Isbitaallada: Xeerarka Qiimeynta Caddaaladda ah.
- E.** Ururka Isbitaalada California, Shuruudaha Fulinta Daryeelka Hay'adaha Sadaqada AB 774 Noofeembar 3, 2006.
- F.** Xeerka Xakamaynta Barclays Californ, Cinwaanka 22, Cutubka 7, Qaybta 75049.
- G.** Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, Tilmaamaha Federaalka ee Dakhliga Saboolnimada. <https://aspe.hhs.gov/topics/poverty-economic-mobility/poverty-guidelines>
- H.** Sharciiga Barnaamijka Xarunta Caafimaadka: Qaybta 330 ee Xeerka Adeegyada Caafimaadka Dadweynaha (42 U.S.C. 254b).
- I.** Xeerarka Barnaamijka: Qaybta 51c ee 42 Xeerka Xeer-nidaamiyayaasha Federaalka (CFR) iyo Qaybaha 56.201–56.604 ee 42 CFR, ee khuseeya Xarumaha Caafimaadka Bulshada iyo Muhaajiriinta, CDPH waxay soo saartay AFL la xiriirta Xeerarka Qiimeynta Caddaaladda ah ee Isbitaallada California, Noofambar 5, 2014.
- J.** Hindise Sharciyeedka Golaha 2297 Xeerarka Qiimeynta Caddaaladda ah ee Isbitaallada iyo Dhakhaatiirta Gurmada Degdegga ah

KA-QAYBQAATAYAASHA XEERKA, OGGOLAANSHIHIISA IYO TAARIKHDIISA

Cidda Siyaasadda waxa ku soo biirisay	
Caawiyayaasha:	Maamule, Koontooyinka Bukaanka
Cidda Siyaasadda iska Kaashatay:	
Madaxa Waaxda:	Agaasimaha Fulinta Dakhliyada
Xubin Ka Tirsan Maamulka Sare ee Fulinta:	Ken Baxter, Maamule Ku Xigeenka Dakhliga

Oggolaanshaha Guddiga	Taariikhda
Oggolaanshaha Agaasimaha	09/15/2026
Guddiga Agaasimayaasha	

Xuquuqda Daabacaadda 2026. Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

Jadwal A

Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka ee La Daabacay ee Sannadka 2026				
Tirada xubnaha Qoyska	Ilaa 100%	Ilaa 400%	Ilaa 450%	Ilaa 550%
1	\$15,960	\$63,840	\$71,820	\$87,780
2	\$21,640	\$86,560	\$97,380	\$119,020
3	\$27,320	\$109,280	\$122,940	\$150,260
4	\$33,000	\$132,000	\$148,500	\$181,500
5	\$38,680	\$154,720	\$174,060	\$212,740
6	\$44,360	\$177,440	\$199,620	\$243,980
7	\$50,040	\$200,160	\$225,180	\$275,220
8	\$55,720	\$222,880	\$250,740	\$306,460
Qiimo-dhimista	100%		75%	50% Bukaannada aan caymiska lahayn

Jadwal B

Jadwalka Kharashka ee Ku Salaysan Dakhliga - CMG Tilmaamaha Dakhliga Guud ee Bil kasta ee Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL) Iyadoo lagu Salaynayo Tirada Dadka Qoyska – Wuxuu Dhaqan-galayaa Sannadka 2026			
Xeerka Qorshaha Caafimaadka	Hay'adaha Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah	Qiimo-dhimista Kharashka Daryeelka Aasaasiga ah	Iska-bixn
Tilmaamaha FPL	Ilaa 400%	Ilaa 450%	Ilaa 550%
Tirada Dadka Qoyska			
1	\$5,320	\$5,985	\$7,315
2	\$7,213	\$8,115	\$9,918
3	\$9,107	\$10,245	\$12,522
4	\$11,000	\$12,375	\$15,125
5	\$12,893	\$14,505	\$17,728
6	\$14,787	\$16,635	\$20,332
7	\$16,680	\$18,765	\$22,935
8	\$18,573	\$20,895	\$25,538
CMG Kharashka Adeegga	\$0 Booqashada Bukaanka Xanuunsan \$0 Kharashka Bixinta Tallaalka Hargabka oo Keliya	\$30 Booqashada Xanuunka ee Bukaanka Cusub / Bukaanka Joogtada ah \$26 Tallaalka Hargabka oo Keliya Maamulka	\$176 WCC \$60 Booqashooyinka Qayb ahaan ah iyo Kuwa aan ahayn WCC \$26 Tallaalka Hargabka oo Keliya Maamulka
Wellness on Wheels	\$0 Booqashada Xafiiska Caafimaadka	\$25 Booqashada Xafiiska Caafimaadka \$	\$25 Booqashada Xafiiska Caafimaadka
Shaybaarada	"Ku Dallac Bukaanka" Haddii uusan bukaanku	"Ku Dallac Bukaanka" Haddii bukaanku marka uu booqashada	"Ku Dallac Bukaanka" (wuxuu biil ka helayaa shaybaarka/radiyoolajiga iyadoo lagu salaynayo qiimaha caadiga ah)

	marka uu booqashada yimaado ku bixin qiimaha la dhimay ee rugta caafimaadka, markaas “Biilka Rugta Caafimaadka Loo Diro.”	yimaado ku bixiyo qiimaha la dhimay ee rugta caafimaadka, markaas “Biilka Rugta Caafimaadka Loo Diro.”	
Radiyoolajiga	"Ku Dallac Bukaanka"	"Ku Dallac Bukaanka"	"Ku Dallac Bukaanka" (Wuxuu biil ka helayaa qaybta raajada iyadoo lagu salaynayo qiimaha caadiga ah)
Daawooyinka La Isu Qoro	Sii Daawada Dhakhtarku Qoray (RX) - Bukaanka ayaa bixinaya	Sii Daawada Dhakhtarku Qoray (RX) - Bukaanka ayaa bixinaya	Sii Daawada Dhakhtarku Qoray (RX) - Bukaanka ayaa bixinaya

***Qoyska – Tirada Xubnaha Qoyska**

Jadwal C

**CHOC/Isbitaalka Xuska ee Degmada Carroll (CCMH) FAP Foomka
Qorshaha Lacagbixinta Muddada Fidsan**

Taariikhda:	Taariikhda Adeegga (DOS):
Magaca Bukaanka:	ADJ Taariikhda:
Dakhliga Bishii: \$	
Ka Jar Kharashka Nolosha Aasaasiga ah:	
Kirada/Bixinta Lacagta Guriga	\$
Dayactirka	\$
Cuntada	\$
Kaydka Alaabooyinka	\$
Adeegyada Guriga	\$
Dharka	\$
Lacagaha kharashka caafimaad	\$

Caymiska	\$
Dugsiga/Daryeelka Ilmaha	\$
Taageerada Ilmaha/Lamaanaha	\$
Gaadiidka	\$
Kharashka Gaariga/Shidaalka/Caymiska	\$
Bixinta Lacagta Gaariga	\$
Dhar dhaqa/Nadaafadda	\$
Wadarta Kharashaadka	\$

Wadarta Dakhliga ka Hara Kharashaadka Nolosha Kadib \$ _____
Qorshaha Lacag-bixinta Muddada Dheer, Lacagta Bishii \$ _____